

Tilmaamaha Uruurinta Baaritaanka Biyaha Ragga (Shahwada)

Waa maxay baaritaanka biyaha ragga (shahwada)?

Baaritaankaan waxaa loo adeegsadaa inuu naga caawiyo aqoonsiga ciladaha taranka ee ragga iyo sidoo kale qaliinka shahwo xirista kadib.

Tilmaamo Gaar ah

Ha samayn wax galmo la xiriira muddo 3 maalmood ah kahor maalinta biyaha (shahwada) lagaa qaadaayo.

Sidee ayaan u uruuriyaa sanbalka?

- Ku qaad sanbalka adiga oo keliya siigeysanaaya. Ha samayn galmo ama ha adeegsan kondhom.
1. Ku shub sanbalka koobka khafiifka ah ee lagu siiyay.
 2. Ku qor magacaaga, taariikhda dhalashada, wakhtiga iyo taariikhda aad sanbalka ku qaaday koobka.
 3. Ku qor koobka taariikhda aad markii ugu danbaysay galmo samaysay.
 4. U keen sanbalka Hennepin Healthcare - Shaybaarka Xarunta Guud (Main Campus Laboratory) (Oo ku yaala Purple Building – Dabaqa 4^{aad}) isla marka aad caaga ku qaado. (Hadday suuragal tahay, 1 saac gudaheed.)

Tilmaamo Muhiim ah:

- Ha dhigin sanbalka shahwada meel qaboow (talaagad) ama meel aad u kulul (meel u dhow kulayliye).

U keen sanbalka Hennepin Healthcare - Shaybaarka Xarunta Guud (Main Campus Laboratory) (Oo Purple Building – Dabaqa 4^{aad}) 701 Park Avenue, Minneapolis, MN keliya.

Waxaa la qabanayaa sanballada:

Isniinta – Jimcada 7:00 subaxnimo. - 2:00 galabnimo.

Sanballada lama qaban doono maalmaha Sabtida, Axada ama maalmaha fasaxa guud.

Haddii aad qabto su'aalo, fadlan wac rugtaada daryeelka caafimaadka guud.

Foomka Uruurinta Baaritaanka Biyaha Ragga (Shahwada)

Patient Label Here

MUHIIM: Fadlan soo qaado warqada marka aad keenayso sanbalka

Fadlan ka jawaab dhammaan su'aalaha soo socda:

Taariikhda Sanbalka la Qaaday: _____

Wakhtiga Rasmiga ah ee Sanbalka la Qaaday: _____ SUBAXNIMO GALABNIMO

Taariikhdii ugu Danbaysay ee Galmada: _____

Sanbalka miyuu la kulmay heerkull aad u kulul ama aad u qaboow: HAA MAYA

LABORATORY USE ONLY:

Date/Time Received in Laboratory: _____

Collection Container Type: Specimen Cup Other: _____

Volume: _____

WBC: _____

pH: _____

Temperature: _____